


Khaalid: Saaxiib Aamin waxaan maalmahan la ildaranahay walaac badan, waayo waan ogahay inaanan Ilaah la ahayn heshiis. Waan tukadaa, waxaan akhriyaa Qur'aanka, laakiin weli waxaan dareemaa culays iyo cabsi badan. Waxaan doonayaa inaan Ilaah layeesho xidhiidh wanaagsan, laakiin markaan isku dayo inaan camalo wanaagsan sameeyo, waxaa igu sii badanaya walbahaarka iyo cabsida. Sidee baan Ilaah ula heshiin karaa? Sidee baan Ilaah uga helikaraa nabad?

Aamin: Su'aal fiican ayaad i weydiisay Khaalid, waxanan kuu hayaa maanta war farxad leh. Laakiin intaanan kuu sheegin warka wanaagsan, waxaan rabaa inaan kaa caawiyo fahamka dhibkaaga.

Sababta aad ugu baahan nahay inaad Ilaahay la heshiisid , waa inaaad marka hore ilaahay ka soocantay. Maxaa keenay inaad ilaahay ka soocantid? Dembigayga. waxaan jabiyey shacigii Ilaah, sidaas darteedna waxaa naga dhaxaysa cadawnimo aniga iyo Ilaah. Sida nabi Ishaacyaah uu yidhi:

"Dembigiinnu wuxuu idin kala soocay Ilaahay, dambigiinna ayaa wejigiisa idinka qariyey si uusan idiin maqal." (Ishacyaah 59:2)

Haddaba ka hor intaanan kuu sheegin sida Ilaah loola heshiiyo, waxaa muhiim ah inaad fahamto laba arrimood:

1. Qiimaha cafiska
2. Baahida loo qabo dhexdhexaadiye

Qof kasta oo Soomaali ah wuu garanayaa in heshiisiintu u baahan tahay labo shay: magdhaw iyo dhexdhexaadiye. Haddii nin qof dilo, qiimaha heshiintu waa magdhaw. Haddii aan la bixin, ma

jirayo heshiis. Sidas bay caddaaladdu u shaqeysaa. xukunka Ilaahna waa la mid—marka dembi la galo, qiimo lay naga rabo ayaa jira. Si aan Ilaah ula heshiino, waana in qiimaha dembiga la bixiyo. Waxaad dhihi kartaa: "Miyaan Ilaah si fudud u cafin karin dembiga?" Maya, ma awoodo. Markaad dib ugu noqoto Aadam iyo Xaawo, dembi kasta wuxuu lahaa qiimo lagu magdhabo; taasi waa sababta dadka Ilaah ku dembaaba ay u bixin jireen xoolo si ay kafaarogud ugu noqdaan dembiyadooda.

Sidoo kale, Ilaah wuxuu Nabi Muuse u sheegay inuusan dembi cafin doonin isagoon ciqaabin (Baxniintii 34:7), Ilaahna waa xaq isma badalo weligiis. Caddaaladda Ilaah waxay had iyo jeer dalbaneysaa magdhaw. Marka magdhawga la bixiyo ka dib, ayaa lala heshiin karaa Ilaah. Dhibka ugu weyn ee ku haystaa waa dembigaaga Ilaahna ma cafinayo magdhaw la,aan.

Khaalid, muxuu yahay magdhawga dembigu? Ilaah baa inoo sheegay: "Mushaharka dembigu waa dhimasho." (Rooma 6:23)

Qiimaha dembigu ma aha towbad, ee waa dhimasho. Ilaah qiimaha dembigaaga wuxuu ka dhigay dhimasho, wuxuu kaa rabaa magdhawgii dembigaaga. Sidaas darteed, si aad Ilaah ula heshiisid waxaad u baahan tahay Badbaadiye diyaar u ah, awoodna u leh inuu kuu dhinto. Kaliya isaga ayaa bixin kara qiimaha dembigaaga si uu u bixiyo magdhawgii ilaah innaga dalbaday, kaagana sii daayo maxkamadda Ilaah.

Sidoo kale waxaad u baahan tahay dhexdhexaadiye.Dhexdhexaadiye ayaa heshiisiin kara labada dhinac. Qof dembi galay idinma heshiisiin karo Ilaah. Ilaah wuxuu mar walba kula macaamilaa dembiilayaasha isagoo adeegsanaya dhexdhexaadiye. Sida Soomaaliduba samayso, sidaasay maxkamadda Ilaahna u shaqeysaa.

Si aad Ilaah ula heshiisid, waa inaad haysato dhexdhexaadiye matali kara labada dhinac—Ilaah iyo bini'aadam. Wuxuu u baahan yahay inuu si buuxda u ahaado Ilaah, sidoo kalena si buuxda u yahay bini'aadam. Wuxuu awood u leeyahay inuu arrintaada xalliyo, waayo waa Ilaah qudhiisii.Sidoo kale wuu ku jecel yahay waayo, wuxuu qaatay jidh bini'aadam.

Haddaba, sideen Ilaah ula heshiin karaa?

Ilaah wuxuu kuu diyaariyey Badbaadiye,Khaalid. Isagu waa Kan dembigaaga bixinaya.Isagu waa Kan idin dhexdhexaadinaya Ilaah. Waana Sayidkeenna Yeshuuca Masiix.

Kani waa warka wanaagsan: "Ilaah wuxuu aduunka kula heshiiyay Masiixa dhexdiisa, isagoo aan dadka ku tirinin dembiyadooda." (2 Korintos 5:19)

Maxaa Ilaah uusan ugu tirinaynin dembiyadooda? Waayo waxaa dembiyadooda u dhintay Yeshuuca. Sida Rasuulku yidhi: "Yeshuuca ayaa naga furay habaaraddii sharciga isagoo habaar u noqday innaga darteen. Waayo waxaa qoran: wuu habaaran yahay kii geed ka soo daldalani." (Galatiya 3:13)

Khaalid, laba jeer mala bixiyaa magdhawga dembiga? Maya! waxaa la bixiyey magdhawgii dembigaaga, waxaad tahay qof xor ah. Waxaad haysataa nabada Ilaah. Waxaa lagula heshiisiiyay Ilaah haddaad rumaysid Yashuuca Ilaah.

Haddaba, maxaad sugeysaa saaxiib?hadda kiiskaaga waxaa xaliyey dhexdhexaadiyaha Ilaah iyo dadka.Sidoo kale wuxuu bixiyay qiimihii heshiisiinta.

Aamiin rumayso isaga, isla markiiba waxaad la heshiin doontaa Ilaah.

"Waxaan idiinku boorinaynaa Masiixa dartii, Ilaah kula heshiiya. Waayo, innaga darteen ayuu ka dhigay dembiile, si aynu u helno xaqnimada Ilaah." (2 Korintos 5:20)